# Baro barbaarin-horaadka

## Macluumaad ku saabsan barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadka Helsinki oo loogu talaggalay qoysaska



# Tusmada


3 Ku soo dhowow barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadka Helsinki

4 Noocyada waxqabadka kala duwan ee barbaarin-horaadka

4 Sidan ayaad u codsanaysaa barbaarin-horaadka

6 Kooxaha carruurta iyo shaqaalaha xannaano-maalmeedka

8 Barnaamijka maalinta xannaano-maalmeedka

10 Marka uu cunuggu xannaano-maalmeedka billaabo

12 Barashada iyo billaabista xannaano-maalmeedka ee Malik

13 Wadashaqeynta guriga iyo xannaano-maalmeedka

15 Aqoonta luqadeed ee dhinacyada badan

15 Taageerada horumarka iyo waxbarashada

16 Waxbarasho-horaadka

17 Waxbarashada diyaarinta ah ee waxbarasho-horaadka iyo horumarinta aqoonta luqada

18 Safir oo ku jira waxbarasho-horaadka

19 Baro dugsiga

20 Waxaa wanaagsan in la xusuusto!

22 Macluumaadyo dheeraad ah iyo linkiyo



# Ku soo dhowow barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadka Helsinki

Hagaha Baro barbaarin-horaadku wuxuu sheegayaa arrimaha ugu muhiimsan barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadka. Hagahan wuxuu adiga iyo cunuggaada idinka taageerayaa billaabista barbaarinhoraadka. Hagahan waxaad ka heleysaa macluumaadka waxqabad ee ku saabsan billaa-bashada barbaarin-horaadka iyo nololmaalmeedka.

Cunuggu wuxuu ku jiri karaa barbaarin-horaadka xannaano-maalmeedka, xannaano-maalmeedka qoyska ama waxqabadka furan ee jardiinooyinka ciyaarta.

Waa muhiim in uu cunuggu ka qaybqaato barbaarin-horaadka. Cunuggaadu barbaarin-horaadka wuu ku ciyaari karaa, ku dhaqdhaqaaqi karaa carruurta kala waxbuu la baran karaa. Waxqabadkeenna waxaa loo qorsheeyay, in cunuggaadu uu wax cusub barto horumarkiisa iyo nololwanaaggiisana waa la daryeelayaa. Waxaan raacaynaa qorshaha barbaarin-horaadka Helsinki waxqabadkeenuna waa mid la qorsheeyay oo hiigsi leh, baahiyaha carruurtana ku xisaabtama. Shaqaalaha barbaarin-horaadku waa kuwa shaqadooda loo tababaray.

Barbaarin-horaadkuna waa xaq uu cunuggu leeyahay. Sannad kahor inta aanay dugsiga u wareegin ayeey carruurta oo dhan ka qaybgalaan waxbarasho-horaadka.

Waxaan rajaynayaa in aad hagahan ka heshaan macluumaad muhiim ah oo ku saabsan barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadka. Shaqaalaha ayaa u diyaar ah in ay macluumaad dheeraad ah kuu sheegaan.

Waxaan idiin rajaynaynaa soo dhoweyn diirran!

Satu Järvenkallas

Maamulaha laanta

# Noocyada waxqabadka kala duwan ee barbaarin-horaadka

Xannaano-maalmeedku waa nooca ugu caansan barbaarin-horaadka. Xannaano-maalmeedka waxaa cunug kasta looga helayaa koox carruur ku habboon. Hagahan ayaan ku sheegaynaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxqabadka iyo shaqaalaha xannaano-maalmeedka.

**Waxbarasho-horaadka:** Carruurta oo dhan waxay 6 sano jirka uga qaybqaataan waxbarasho-horaadka, sannad kahor billaabashada dugsiga. Hagahan ayaan ku sheegeynaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan waxbarasho-horaadka.

**Xannaano-maalmeedka qoysku** waa xannaanyn iyo barbaarin ka dhacda guriga xannaaneeyaha qoyska. Xannaano-maalmeedka qoyska waxaa halkii kooxba ku jira afar cunug. Kooxda xannaano-maalmeedka qoyska waxaa ka shaqeeya labo xannaaneeye qoys carruurtuna waa sideed. Xannaano-maalmeedka qoyska waxaa loo soojeediyaa carruurta u dhexeysa 1-4 sano.

**Naadiyada waxaa** loogu talaggalay carruurta jirta 2-4 sano ee reer Helsinki. Naadiyadu waxay ka jiraan jardiinooyinka ciyaarta iyo dhowr xannaano-maal-meedyada oo ay degmadu leedahay waana lacag la'aan. Naadiyadu waxay waxqabad leeyihiin 1-4 maalmood todobaadki qiyaastii 2,5-3 saacadood maalinti.

**Jardiinooyinka ciyaarta** waxaa ka jira waxqabad wadajir ah oo loogu talaggalay carruurta yaryar iyo waalidkood gelinka hore, kahor 12ka. Jardiinooyinka ciyaarta waxaa galabtii waxqabad loogu qabanqaabiyaa dugsilleyda yaryar. Carruurta waxaa lagu soo ciyaarsiin karaa aagga jardiinada ciyaarta maalmaha todobaadka oo dhan wakhtigi uu doonaba ha ahaadee.

Waxaa kale oo barbaarin-horaadka xannaano-maalmeedka, xannaano-maalmeedka qoyska iyo waxbarasho-horaadka loo bixiyaa sidi adeeg gaar ah oo kale.

# Sidan ayaad u codsanaysaa barbaarin-horaadka

- Waa in aad codsataa xanaano-maalmeedka, naadiga iyo xannaano-maalmeedka qoyska ugu dambeyn afar bilood kahor wakhtiga la doonayo in la billaabo.
- Waxaad xannaano-maalmeedka ama xannaano-maalmeedka qoyska ku codsan kartaa internetka adigoo isticmaalaya nidaamka macluumaadka dan-qabsashada Asti ee magaalada Helsinki (asti.hel.fi). Hagitaanka adeegga barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadka ayaa haddii loo baahdo talo kaa siinaya arrimaha la xiriira codsashada.
- Waxaad barbaarin-horaadka ama booska naadiga ku codsan kartaa internetka adigoo isticmaalaya dan-qabsashada elegtroonigga ah ee magaalada Helsinki (asiointi.hel.fi).
- Haddii adiga/qoyskaadu aanu lahayn lambarka aqoonsiga Finnishka, adiga/qoyskaadu aanu lahayn aqoonsiga bangiga, codsashada elegtroonigga ah ma ahan mid adiga/qoyskaada u suurageleysa ama qof qoyskaada kamid ah uu sameeyay mamnuucidda macluumaad gudbinta, waxaad barbaarin-horaadka ku codsan kartaa foomka warqadda. Ku soo celi codsiga warqadda ah ugu horeyn boostada cinwaankeedu yahay Hagitaanka adeegga barbaarin-horaadka (Varhaiskasvatuksen palveluohjaus), Työpajankatu 8 PL 58300, 00099 Magaalada Helsinki.
- Haddii aan la saadaalin karin baahida barbaarin-horaadka, waa in aad booska barbaarin-horaadka codsataa sida ugu dhakhsaha badan, si kastaba ha ahaatee ugu dambeyn 2 todobaad kahor kahor marka uu cunuggaadu booska u baahanyahay.
- Waxaad rajayn kartaa xannaano-maalmeed cayiman adigoo macluumaadkaas codsiga ku qoraya. Haddii boosaska codsigaada ku qoran aanay bannaanayn, waxaan ku siinaynaa booska kuugu dhow ee Helsinki ku yaal.

Barbaarin-horaadka xannaano-maalmeedka iyo xanaano-maalmeedka qoysku waa lacag. Lacagta la bixinayo waxaa go'aaminaya dakhliga waalidka. Waxaa kale oo bixinta lacagta saamayn ku leh wakhtiga xannaanada

iyo baaxadda qoyska. Haddi uu dakhliga waalidku yaryahay, barbaarin-horaadku waa lacag la'aan. Barbaarin-horaadka carruurta 5 sano jirka ah iyo waxbarasho-horaadka carruurta 6 sano jirka ah waa lacag la'aan 4 saac maalintii. Naadiyada waa lacag la'aan.

Macluumaadka rasmiga ah ee ku saabsan codsashada waxaad ka heleysaa hel.fi ([hel.fi/helsinki/fi/kasvatus-ja-koulutus/paivahoito/paivakotihoito/hakeminen/](hel.fi/helsinki/fi/kasvatus-ja-koulutus/paivahoito/paivakotihoito/hakeminen/)), hagitaanka adeegga barbaarin-horaadka ama jardiinooyinka ciyaarta.

Waxaad sidoo kale codsan kartaa barbaarin-horaadka gaarka ah. Xannaanomaalmeedyada iyo xannaaneeyayaasha qoyska ee gaarka ah ayaa ku siinayaa macluumaad dheeraad ah. ([hel.fi/helsinki/fi/kasvatus-ja-koulutus/paivahoito/yksityinen-paivahoito/](hel.fi/helsinki/fi/kasvatus-ja-koulutus/paivahoito/yksityinen-paivahoito/))



# Kooxaha carruurta iyo shaqaalaha xannaano-maalmeedka

Xannaano-maalmeedka waxaa ku jira koox carruureed noocyo badan, kuwaas oo ay ku jiraan carruur kala da' ah. Iyadoo da'da ku xiran, waxay carruurtu isugeyn noqon karaan 8-21.

Waxqabadka xannaano-maalmeedka waxaa mas'uul ka ah maamulaha xannaanada. Iyada ayaad la xiriiri kartaan, haddii aad su'aal ka qabtaan shaqaalaha xannaano-maalmeedka ama hagitaanka iyo waxqabadka xannaano-maalmeedka. Macallinka barbaarin-horaadka ayaa ka mas'uul ah waxqabadka hiigsiga leh ee kooxda carruurta. Macallimiinta iyo carruur-hayeyaasha barbaarin-horaadku waxay si wadajir ah ugu dadaalaan nololwanaagga iyo barnaamij-maalmeedka kooxda carruurta. Waxaa kale oo xannaano-maalmeedka ka shaqayn kara kaaliye ama waxaa si joogto ah u booqan kara macallinka gaarka ah ee barbaarin-horaadka iyo macallinka barbaarin-horaadka ee finnishka sidi luqad labaad ah oo kale. Xannaano-maalmeedyada qaarkood waxaa ka shaqeeyaa hage luqado badan ku hadla. Hagaha luqadaha badan wuxuu carruurta ka caawiyaa in ay afkooda hooyo ku bartaan carruurta kale iyo waxqabadka xannaanada. Mid kamid ah shaqooyinka muhiimka ah ee hagaha luqadaha badan waa taageeridda wadashaqeynta u dhexeysa guriga iyo xannaano-maalmeedka. Wadashaqeyntu waa ay sahlanaataa, marka aad heysato fursad aad luqaddaada u isticmaali karto ka gungaaridda arrimaha.

Magacyada shaqaalaha iyo macluumaadka xiriirka ee xannaano-maalmeedka waxaa lagu soo gudbinayaa ogeysiisyada iyo boorka ogeysiiska ee xannaano-maalmeedka.

Waxaa kale oo xannaano-maalmeedka ka shaqeeyaa shaqaale ka tirsan adeegga cuntada iyo nadaafadda.

# Barnaamijka maalinta xannaano-maalmeedka

Macluumaadka rasmiha ah ee barnaamijka maalinta xannaano-maalmeedka waxaa lagu siinayaa marka uu cunuggiinu xannaano-maalmeedka billaabo.

**Tusaalaha sida ay maalintu u socoto:**

**Saacadda u dhexeysa 6.15-8.30** carruurtu waxay yimaadaan xannaanomaalmeedka, waa dheelaan, waa ciyaaraan, buugaag ayeey fiirsadaan, waxay dhegeystaan muusig

**8.00 saac** waxaa carruurta la siiyaa quraac

**Saacadda u dhexeysa 8.30-11.00** bannaan aadista, dheesha iyo waxqabad kale oo la qorsheeyay

**11.00 saac** waxaa carruurta la siiyaa qado, markaas kaddibna carruurtu waxay seexdaan hurdo-maalmeed

**14.00 saac** waxaa carruurta la siiyaa cunto fudud

**Saacadda u dhexeysa 14.30-17.00** waxqabad la qorsheeyay, dheel iyo bannaan aaditaan

Shaqaaluhu waxay cunugga la joogaan xaaladaha kala duwan ee maalinta. Shaqaaluhu cunugga waa daryeelaan waxayna ka caawiyaan in uu fahmo waxa xiga ee dhacaya, haddii ay luqadda finnishku cunugga ku cusub tahay. Xaaladaha kala duwan ee maalinta xannaano-maalmeedka (tusaale cunto-cunista, bannaan aadista, nasasho maalmeedka), iyo waxa xiga ee dhacaya. Shaqaaluhu waxay wax u sheegayaan iyagoo isticmaalaya tusaale ahaan kaararka sawirka.


Qolka kooxda waxaa ku dheggan waxqabadyada maalinta oo la sawiran, kuwaas oo ay maalinta xannaano-maalmeedku ka kooban tahay. Shaqaalaha kooxda ayaa warqadda todobaadka ama boorka ogeysiiska waalidka ugu sheegaya, waxqabadka la qabanqaabinayo, ciyaaraha socda ee la ciyaarayo nooca ay yihiin iyo waxyaabaha kooxda lagu barto.

## Dalxiisyada gaagaaban iyo jadwalkoodaba waalidka waxaa loogu soo sheegayaa farriin.



## 6.15–8.30

Carruurtu waxay yimaadaan xannaano-maalmeedka, waa dheelaan, waa ciyaaraan, buugaag ayeey fiirsadaan muusigna waa dhegeystaan.



## 8.00

Waxaa carruurta la siiyaa quraac.




## 8.30–11.00

Bannaan aadista, dheesha iyo waxqabad kale oo la qorsheeyay.



## 11.00

Waxaa la siiyaa qado, markaas kaddibna carruurtu waxay seexdaan hurdo-maalmeed.



## 14.00

Waxaa carruurta la siiyaa cunto fudud.



## 14.30–17.00

Waxqabad la qorsheeyay, dheel iyo bannaan aaditaan.

# Marka uu cunuggu xannaano-maalmeedka billaabo

Billaabista xannaano-maalmeedku waa arrin cusub oo hiyikac u leh cunugga iyo qoyska. Waa muhiim in kalsooni ka dhexjirto shaqaalaha xannaano-maalmeedka iyo waalidiinta. Markaas cunugguna wuxuu dareemayaan ammaan. Shaqaalaha waxaa saaran waajibka xafididda xogta. Wadahadallada kalsoonida leh ee u dhexeeya waalidka iyo shaqaalaha marnaba looma shee-gayo waalidiinta kale.

Qoraal ahaan ayaa loo soo dirayaa go'aanka booska xannaano-maalmeedka. Go'aanka kaddib waxaa idinla soo xiriiraya shaqaalaha xannaanomaalmeed-kaoo idiin ballaminaya soo barashada iyo wadahadalka billaabista. Shaqaalaha xannaano-maalmeedka ayaa waxay wadahadalka billaabista idiinkugu sheegayaan waxqabadka iyo habsami-socodka xannaanomaalmeedka, alaabaha (dhar, kabo, xafaayado) uu cunuggu xannaanada ugu baahanyahay iyo hiisgiyada muhiimka u ah waxqabadka xannaano-maalmeedka.

Wadahadalka billaabista waxaad ku weydiin kartaan arrimaha la xiriira xannaano-maalmeedka iyo billaabista. Wadahadalka waxaa sidoo kale lagu lafaggurayaa arrimaha muhiimka ah ee cunugga la xiriira, kuwaas oo ay wa-naagsantahay in ay xannaanadu ogaato. Arrimahan waa tusaale ahaan luqadda guriga ee cunugga, walaaladiis iyo arrimaha la xiriira nooca cunto ee uu cuno iyo caafimaadkiisa. Wadahadalka billaabista waxaa loo isticmaalaa turjubaan, haddii aanay jirin luqad waalidka nagala dhexeeysa.

Xilliga barashadu waa shan maalmood. Cunuggu wuxuu isagoo idinka idinla socda xannaano-maalmeedka baranayaan dhowr maalmood. Waxaa kale oo aad arkaysaan nooca ay tahay xannaano-maalmeedka cunuggu iyo waxyaabaha ka dhacaya oo dhan, sidoo kale waxaad cunugga kala hadli kartaan xannaanada marka uu guriga joogo. Barashada wadajirka ah kaddib waxaa joogitaanka xannaano-maalmeedka marka hore loo baran karaa maalmaha xoogaa gaaban.



# Barashada iyo billaabista xannaano-maalmeedka ee Malik

Malik oo 2 sano jir wuxuu billaabayaa kooxda saanqaadka ee xannaano-maalmeedka Sinivuokko. Malik weli kuma hadlo finnishka xannaano-maalmeedkuna waa meel isaga ku cusub. Macallinka barbaarin-horaadka ee kooxda ayaa wacay waalidka Malik waxayna wada yeesheen wadahadalka billaabista. Malink wuxuu hooyadiis la bartay xannaano-maalmeedka. Inti lagu jiray xilliga barashada oo qaadatay shan maalmood ayeey waxay hooyadu Malik xannaanada la joogtay qaab ah, in billowga todobaadki ay kooxda xannaano-maalmeedka u raacday bannaanka, bartamihi todobaadkana waxay aadista bannaanka kaddib la joogtay ciyaarta gudaha dhammaadki todobaadkana waxay ka qaybqaateen cunista cuntada.

Joogitaanka hooyadu waxay dejinaysaa Malik wuxuuna si deggan u baranayaa bey'ada xannaano-maalmeedka isagoo og, in hooyadu ay xaaladda cusub la joogto. Shaqaalaha xannaano-maalmeedku waxay hooyada iyo Malik tuseen qolalka xannaano-maalmeedka waxayna sidoo kale tuseen, meesha ay ku yaalaan goobta cunto-cunista, wakhtiga nasashada iyo takabbaanka Malik. Malik todobaadkan kaligiis ayaa joogaya xannaano-maalmeedka.

Malik wuxuu soo maray maalinta xannaano-maalmeedka ee ugu horreeysay. Malik wuxuu yara ooyay subaxdi, markii ay hooyadu sii baxaysay. Macallimadda barbaarin-horaadka Leena ayaa Malik qalbiga u qaboojisay dhabtana ku qabatay. Sawirada xayawaanka ayeey buugga ka fiirsadeen. Leena waxay heysataa xirmo ay ku jiraan sawiro kala duwan oo ka hadlaya nololmaalmeedka xannaano-maalmeedka, kuwaas oo ay Malik ka tustay waxa xiga ee dhacaya. Cuntadu waxay maanta ahayd kalluun iyo baradho qooshan. Marki lagu jiray aadista bannaanka ee galabti wuxuu Malik carruur kale baabuur kula ciyaarayay saxaaradda ciidda. Si farxad leh ayuu u qayliyay markii uu arkay hooyadi in ay isaga kaxeyso u timid. Maalin fiican ayeey ahayd!



# Wadashaqeynta guriga iyo xannaano-maalmeedka

Wadashaqeynta guriga iyo xannaano-maalmeedka waa mid mar kasta cunugga u wanaagsan. Waa la idinku soo dhoweynayaa ka qaybqaadashada waxqabadka barbaarin-horaadka. Waxaad sidoo kale shaqaalaha iyo cunugga kala qaybqaadan kartaan qorsheynta iyo horumarinta waxqabadka. Su'aalo-weydiinta macaamiisha waxaa loo hirgelinayaa si joogto ah, si gaar ahna waa la idinkugu wargelinayaa. Ka jawaabista su'aalo-weydiintu waxay fursad kuu siinaysaa in aad sheegtaan, sida aad u aragtaan in barbaarinho-raadka loogu guuleystay.

Cunug kasta waxaa loo dejinayaa qorshaha barbaarin-horaadka (Vasu:ga cunugga). Macallinka barbaarin-horaadka ayaa idinka iyo cunuggaba idin la gelaya wadahadalka barbaarin-horaadka, kaas oo looga fekerayo waxa uu cunuggu xiiseeyo, waxa cunugga ka farxiya iyo in ay u wanaagsantahay in uu koox ku jiro. Haddii loo baahdo, turjubaan ayaa wadahadalka loo isticmaalayaa.

Macallinka ayaa qorshaha ku qoraya, sida xannaano-maalmeedka uga shaqeynayo horumarinta cunugga iyo waxbaarshadiisa iyo sida aqoonta luqadeed ee cunugga loo horumarinayo. Waxaa lagu xisaabtamaa marka waxqabadka lagu jiro asalka dhaqankiisa iyo caqiidadiisa (diinta).

Hirgelinta qorshaha waxaa wadajir loola qiimeynayaa islamarkaasna loola dhammaystirayaa cunugga iyo waalidka sannadkiiba marka iyo markasta oo loo baahdo in la qiimeeyo. Barbaarin-horaadku waxay ku salaysan tahay-qorshaha barbaarin-horaadka.

Hiigsiyada iyo waxqabadka barbaarin-horaadka waxaa haga qorshaha barbaarin-horaadka iyo sharciga barbaarin-horaadka.

Sharciga barbaarin-horaadku wuxuu sheegayaa, in barbaarin-horaadku uu carruurta oo dhan u noqdo mid loo simanyahay. Barbaarin-horaadku waa in uu noqdaa mid hiigsi leh waana in uu sidoo kale cunugga fursad u siiyaa ciyaar, dhaqdhaqaaq, waayo-aragnimo farshaxan iyo waxqabad dhaqanka ku salaysan.

Bogga Internetka ee Helsinki waxaa ku jira qorshaha barbaarin-horaadka Helsinki oo ku qoran af finnish, iswiidhish iyo ingiriis.

## Carruurtu waxay barbaarin-horaadka wax ka bartaan iyagoo dheelaya islamarkaasna dhaqdhaqaaqaya

Aagagga waxbarashadu waa tusmooyin, kuwaas oo la iskula xirayo waxqabadka iyo ciyaarta carruurta oo waafaqsan qorshaha kooxda iyo waxyaabaha ay carruurtu xiiseynayaan. Carruurtu bey'ado kala duwan ayeey wax ku baranayaan, xittaa marka ay ku jiraan aadista bannaanka iyo dalxiisyada. Waxyaabaha barashada ku jira waxay kicin karaan ciyaaraha, sheekooyinka, dalxiisyada gaaban iyo xaaladaha isdhexgalka ee kala duwan. Hawsha shaqaaluhu waa xaqiijinta, in waxqabadka barbaarineed uu sare uqaadayo horumarka iyo waxbarashada carruurta kala da'da ah.

**Ka sokow aagagga waxbarashada waxaa waxqabadka fiiro loogu yeelanayaa horumarka aqoonta baaxadda leh ee cunugga.**

### Aqoonta baaxadda leh




Fekerka iyo barashada.



Is-daryeelidda iyo aqoonta nololmaalmeedka.



Aqoonta akhris qorista oo badan iyo aqoonta macluumaadka iyo tegnoolajiyada.



Aqoonta dhaqameed isdhexgalka iyo ismuujinta.



Ka qaybqaadashada iyo saameyn ku yeelashada.



QORSHAHA WAXBARASHO-HORAADKA:
aqoonta macluumaadka iyo tegnoolajiyada.

# Aqoonta luqadeed ee dhinacyada badan

Cunug kasta wuxuu wax qiimo leh u dareemi karaa naftiisa, luqaddiisa iyo qoyskiisa. Marka uu cunuggu si fiican u barto luqadda ama luqadaha guriga laga isticmaalo, waxaa u sahlan in uu luqadda finnishkana barto. Waa muhiim in cunugga guriga lagula sheekeysto, sheekooyin loo sheego, kor wax loogu akhriyo islamarkaasna la ballaariyo kaydka erayada ee luqaddiisa.

Waxbarashada finnishka oo sidii luqad labaad ah (S2) waxaa xannaanomaal-meedka laga bixiyaa isagoo qayb ka ah ciyaarta iyo waxqabadka kale iyo xaaladaha maalinta oo dhan, sida cunto-cunista iyo labisashada. Aqoonta luqadda finnishka ee cunugga waa la horumarinayaa waxaana laga caawinayaa in uu iskiis isu muujiyo. Barashada luqadda waxaa loo kaalmaysanayaa tusaale ahaan masawiro ama wax sawirid. Waxaa cunugga-laga caawinayaa in uu fahmo waxa xiga ee dhacaya, in uu sheego waxa uu rajaynayo iyo in uu caawimaad codsado.

Waxbarashada S2 waxay taageertaa horumarka luqadeed ee cunugga.Cu-nuggu wuxuu ku tababaran karaa in uu luqadda finnishka wax ku dhegeysto, wax ku sheego aragtidiisa iyo fikraddiisana si tartiib-tartiib ah ugu muujiyo.

# Taageerada horumarka iyo waxbarashada

Mararka qaar cunuggu wuxuu horumarkiisa iyo waxbarashadiisa ugu baahanyahay caawimaad iyo taageero gaar ah. Markaas waxaa wadajir uga fekerayo sida ugu fiican ee loo taageeri karo horumarka iyo waxbarashada cunugga macallinka gaarka ah ee barbaarin-horaadka, macallinka barbaa-rinhoraadka ee cunugga iyo idinka. Waxaan wadajir uga fekeraynaa, sida aan cunugga uga caawin karno in uu ku guuleysto islamarkaasna ku farxo waxbarashada barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadka. Haddii loo

baahdo wadahalka waxaa qayb ka ah turjubaan. Gadaal dambe ayaa kulan kale laga qabanqaabinayaa, kulankaas oo lagu qiimeynayo, in cunuggu uu helayo taageero ku filan. Mararka qaar waxaad kulamada qayb ka ah khubaro kale, kuwaas oo laga yaabo in uu cunuggu u baahanyahay caawimaadooda. **Kalkaalisada caafimaadka iyo dhakhtarka rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanku** waa khubarada horumarinta caafimaadka, koritaanka iyo horumarka. Barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadku waxay wadashaqeyn la leeyihiin kalkaalisada caafimaadka ee rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka.

# Waxbarasho-horaadka

Waxbarasho-horaadka waxaa la qabanqaabiyaa inta lagu jiro wakhtiyada waxqabadka dugsiyada afar saacadood maalinti. Ka sokow waxbarasho-horaadka, cunuggu wuxuu isla goobta waxbarasho-horaadka uga qaybqaa-dan karaa barbaarin-horaadka.

### Waxbarasho-horaadku waa waajib.

Carruurta oo dhan waxay ka qaybqaadanayaan waxbarasho-horaadka sannad kahor waxbarashada aasaasiga ah. Waxbarasho-horaadku waxay horumarisaa korriinka, koboca iyo waxbarashada cunugga. Waxaa ay fududeeysaa in uu ilmuhu waxbarasho-horaadka kaddib u sii gudbo iskoolka.

Waxbarasho-horaadku waxay leedahay qorshe u gaar ah. Waxbarasho-horaadkawaxaa fiiro gaar ah loogu yeeshaa ilmaha baahiyadiisa gaarka ah iyo qaabka uu wax u barto ee gaarka ah. Ciyaarta, dhaqdhaqaaqa iyo baarista ay wadajirka ku yihiin carruurta iyo dadka waawayn waa qaabka waxbarista loogu fuliyo ee wax lagu barto marka la dhiganayo waxbarasho-horaadka.

### Daryeelka ardayda

Cunuggu wuxuu waxbarasho-horaadka ku leeyahay adeegyada daryeelka ardayda. Caawimaadda taageerada daryeelka ardayda waxaa lagu xaqiijinayaa nololwanaagga iyo waxbarashada cunugga. Daryeelka ardayda waxaa ku jira adeegyada cilmu-nafsiyaqaanka iyo sooshalka dugsiga,

waad lala xiriiri kartaa, haddii aad ka welwelsantahay arrimaha cunugga. Macluumaadkooda xiriirka waxaa laga helaa kooxaha waxbarasho-horaadka ama waxaad weydiin kartaa shaqaalaha waxbarasho-horaadka. Wadahalladu waa kuwa markasta kalsooni leh.

## Waxbarashada diyaarinta ah ee waxbarasho-horaadka iyo horumarinta aqoonta luqada

Haddii aanu cunuggu weli aqoonin luqadda finnishka, wuxuu fursad u heystaa in uu codsado waxbarashada diyaarinta ah ee waxbarashohoraadka. Maamulaha xannaano-maalmeedka ama sooshalka qoyska ayaa kaa caawin kara buuxinta codsiga. Waxbarashada diyaarinta ah waxaa lagu qabanqaa-biyaa isla meesha lagu bixiyo waxbarasho-horaadka. Waxbarashadu waxay xoogga saaraysaa waxbarashada finnishka oo sidi luqad labaad ah (S2).



# Safir oo ku jira waxbarasho-horaadka

Kooxda waxbarasho-horaadka ee Safir waxay todobaad kasta tagaan kaynta maalinta soo socotana waa dalxiiski kaynta ee ugu horreeyay. Safir weli kuma hadlo luqadda finnishka, laakiin wuxuu sawiro ku fahmayaa, waxa la samaynayo.

Maalinta ka horreeysa maalinta dalxiiska gaaban ayeey kooxda carruurtu isu imaatin wadajir ah carruurta kula fiirsadaan sawiro ka hadlaya dalxiiska gaaban ee soosocda. Waxaa halkaas laga arkayaa meesha dalxiiska gaaban loo tegayo, ku labisashada funaanadaha ammaanka, ku socoshada safka labada layn ah iyo waxqabadka keynta ka dheceysa. Boorka sawirada oo kan lamid ah ayaa hooyada la siinayaa marka ay soo doonto Safir. Dalxiiska gaaban waxaa si horudhac ah looga sheekeysan karaa guriga.

Safir wuxuu si kalsooni leh u aadayaa dalxiiska gaaban, sababtoo ah wuu fahmayaa meesha la aadayo. Keynta waxaa si wadajir ah loogu baranayaa bey'ada waxaana lala ciyaarayaa asxaabta. Safir wuxuu si xiiso leh uu raadinayaa ulo, dhagxaan wuxuuna saaxiibadiis la dhisayaa waab. Carruurta iyo dadka waaweyn waxay sawiro ka qaadanayaan dhacdooyinka dalxiiska gaaban.

Dalxiiska gaaban kaddib waxaa Safir lala fiirinayaa islamarkaasna lala magacaabayaa sawirada goobta dalxiiska, ciyaaraha iyo xasharaaadka la soo arkay. Iyadoo sawiro la kaashanayo ayaa sidoo kale waalidka loo sheegayaa dhacdooyinka dalxiiska gaaban.

Galabti wuxuu Safir saaxiibadiis la jarjarayaa sawiro ku saabsan waxyaabihi dalxiiska gaaban lagu soo arkay kaddibna wuxuu ku kooleynayaa buuggiisa. Isaga ayaa sawiraya qaar kamid ah xayawaanka uu soo arkay. Safir wuxuu buugga geynayaa gurigiisa, si uu dalxiiska gaaban luqadiisa ugu xusuusto isagoo qoyska la jooga.



# Baro dugsiga

Dugsiga waxaa la soo baranayaa inta lagu jiro sannadka waxbarashoho-raadka. Inta lagu jiro sannadka waxbarasho-horaadka waxaa carruurta loo qabanqaabinayaa waxqabad ay ku jiraan ardayda dugsiga xaafadda. Waalidka waxaa loo qabanqaabinayaa fursad ay ku soo bartaan dugsiga iyo waxqabadkiisa.



# Waxaa wanaagsan in la xusuusto!

**Muxuu cunuggaadu xannaano-maalmeedka ugu baahanyahay?**

Xannaano-maalmeedka ayaad ka heleysaa macluumaadka rasmiga ah ee ku saabsan waxyaabaha uu cunuggaadu u baahanyahay in uu soo qaato.

Halkan waxaa ku qoran xoogaa tusaalooyin ah:



Xafaayad, munjuruc iyo boombalada jiifka, kabaha gudaha, surwaalka gudaha iyo dharka beddelka. Dharka beddelku wuxuu noqon karaa hal labbis, kastuumo, shaati, sigsaan iyo gacmo-gashi.



Dharka bannaanka lagu aado oo ku habboon hawada bannaanka iyo heerkulka. Dharka roobka: surwaalka qoyaanka, jaakadda roobka, gacmo-gashiga qoyaanka iyo buudka cinjirka ah.




**Magac ku qor dharka cunugga.** Carruurtu waxay heystaan dhar iyo kabo badan oo isla mid ah. Marka kabaha cinjirka ah uu magca ku qoranyahay, ma isku qasmayaan ama lumayaan.

**Lama oggola in uu cunug jirran yimaado xannaano-maalmeedka.** Haddii uu cunuggu jirrado, ama uu sabab kale xannaano-maalmeedka uga maqanyahay, waa in isla subaxdi lagu wargeliyaa xannaano-maalmeedka. Haddii uu cunuggu maalinti jirrado, waalidka ayaa lagu wargelinayaa cunuggana sida ugu dhakhsaha badan ayaa guriga loogu wadayaa.

**Maqnaanshiyaha waxaa lagu wargelinayaa xannaano-maalmeedka.** Waa muhiim in aad taqaan lambarka telefoonka, xusuusato magaca xannaano-maalmeedka iyo magaca kooxda cunugga.

## Cunugga waa la keenaa waana laga wadaa xannaano-maalmeedka.

Waalidiintu waxay si waafaqsan wakhtiyada xannaanaynta ee lagu heshiiyay ku keenaan kuna kaxeeyaan carruurta. Waalidku wuxuu cunugga geynayaa kooxdiisa wuxuuna xaqiijinayaa in shaqaaluhu uu cunugga ka qaabilay. Marka cunugga xannaano-maalmeedka laga kaxeeynayo oo guriga loo wadayo, waxaa la salaamaa shaqaalaha. Waa in ay ogaadaan in cunugga guriga loo waday. Cunuggu kaligiis kama bixi karo deyrka xannaano-maalmeedka.

Soo doonayaasha kaydka ah waxay cunugga soo dooni karaa marka uu waalidku shaqaalaha kula heshiiyo. Cunugga waxaa lagu wareejinayaa waalidka oo kaliya ama soo doonaha kaydka ah ee lagu heshiiyo.

# Macluumaadyo dheeraad ah iyo linkiyo

**Hagitaanka adeegga barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadka:**
ayaa haddii loo baahdo hagitaan iyo talo kaa siinaya arrimaha la xiriira codsashada iyadoo la isticmaalayo iimaylka: varepalveluohjaus@hel.fi
telefoonka: 09 310 80488

**Adeegga talabixinta barbaarinta iyo waxbarashada:**
ayaa ka jawaabaya su'aalaha quseeya: barbaarin-horaadka, xannaanooyinka, xannaano-maalmeedyada qoyska, jardiinooyinka ciyaarta, dugsiyada hoose-dhexe, dugsiyada sare iyo waxbarashada xirfadda iyadoo la isticmaalayo
telefoonka: 09 310 44986

Fiiri bogagga www:
hel.fi/helsinki/fi/kasvatus-ja-koulutus/paivahoito/paivahoidon-vaihtoehdot/

Fiiri bandhigga: Waxqabadka, ciyaarta iyo saaxiibada xannaano-maalmeedka
hel.fi/static/liitteet/kasvatuksen-ja-koulutuksen-toimiala/Varhaiskasvatus/Helsinki/Helsinki/14/index.html

Hagaha baro dugsiga oo af finnish ku qoran
hel.fi/static/liitteet-2019/KasKo/koulu-tutuksi.pdf

Hagaha baro dugsiga oo af iswiidhish ku qoran
hel.fi/static/liitteet-2019/KasKo/bekanta-dig-med-skolan.pdf

Hagaha baro dugsiga oo af ingiriis ku qoran
hel.fi/static/liitteet-2019/KasKo/introduction-to-school.pdf

Hagaha baro dugsiga oo af ruush ku qoran
hel.fi/static/liitteet-2019/KasKo/koulu-tutuksi-venaja.pdf

Hagaha baro dugsiga oo af soomaali ku qoran
hel.fi/static/liitteet-2019/KasKo/Koulu-tutuksi-somali.pdf

Hagaha baro dugsiga oo af carabi ku qoran
hel.fi/static/liitteet-2019/KasKo/koulu-tutuksi-arabia.pdf



www.hel.fi

